



## Ku soo Dhawoow Sannad-dugsiyeedka 2020-21!

Dhammaanteenna oo joogta LEAP High School waxaynu sugi la'nahay inaynu aragno fasallada 9-12 maalinka **Talaadada, Sept. 8**

Degmada Saint Paul Public Schools waxay badi jiilaalka diyaarineysay qorsheyaal loogu diyaar-garoobayay dib-ugu-soo-noqodkaaga iskoolka. Caadiyan, farrintan waxay ka hadli jirtay maalinka jadwalka la qaadanayo, alaabta iskoolka la iska rabo, tallaallada, iwm. Sannadkanse waxaan garowsaday in taa beddelkeeda aad u baahan tahay xog ku saabsan qaabka uu noqon doono iskoolka maadaama aynu billaabi doono waxbarashada durugsan ee khadka internatka.

Xog dheeraad ah waxaad iyo wararkii u dambeeyay ee quseeya sannad-dugsiyeedka cusub waxaad ka heli kartaa shebekadahan hose:

- <https://www.spps.org/leap>
- [spps.org/reopen2020](https://www.spps.org/reopen2020)
- [spps.org/distancelearning](https://www.spps.org/distancelearning)
- [spps.org/virtualllearning](https://www.spps.org/virtualllearning)
- [spps.org/backtoschool](https://www.spps.org/backtoschool)
- Waxaan soo dirayaa faahfaahin dheeraad ah oo quseysa qorshaheenna toddobaadyada soo socda. Waxaan boggan <https://www.spps.org/leap> ku qori doonaa wararkii u dambeeyay. Shaqaalaheenna waxay diyaar u yihiin inay la shaqeeyaan qoyskaaga, waxaynu sugi la'yihiin inay kugu arkaan waxbarashada la iska daawanayo markuu iskoolku billawdo, waxaana rajeyn in sannadkan aakhirkiisa loo beddelo waxbarasho fasalka la imanayo haddii la xakameeyo saf-marka COVID-19.

Maalinka koowaad ee iskoolka wuxuu noqon karaa mid culeys ku hayo ardayda, shakina kuma jiro sannadkan inuu la iman doono caqabado cusub. Hoos waxaa ku qoran waxyaalo aad sii ogaan kartid si adiga iyo ilmahaagaba aad usii diyaargarowdaan.

## Waxbarashada Durugsan iyo Waxyaalaha laga Rabo Ardayga iyo

### Qoyska

Fadlan isha mari oo u isticmaal waxyaalahan hoose ee tiknoolajiyadeed tilmaame ahaan si aad u xaqiijisid in aad diyaar u tahay maalinka koowaad ee iskoolka. Liiska waxyaalaha la iska rabo waxaad ka helaysaa halkan: [spps.org/fallchecklist](https://www.spps.org/fallchecklist).

### Caawinta dhanka iPad-ka

Haddii uu iPad-kaagu hallaabay ama u baahan yahay in la beddelo, fadlan u soo sheeg arrinkan email ahaan ama taleefan ahaan xafiiska tiknoolajiyadda ee Saint Paul Public Schools Technology Services:

- Email: [familysupport@spps.org](mailto:familysupport@spps.org)
- Wac: 651-603-4348 saacadaha 7 a.m. – 4 p.m.. Fadlan farriin faahfaahsan duub, taleefanka waa lagu gu soo celin sida ugu dhaqso badan.

Haddii aad dhib kala kulantid iPad-kaaga, la xiriir macallinka ardaygaaga ama iskoolkeenna. Markii la soo gudbiyo warbixintaada, qof ka tirsan kooxda tiknoolajiyadda ee SPPS technology support team ayaa kula soo xiriiri doono si loo beddelo iPad-ka si ay aysan hakad u gelin waxbarashada khadka internetka lagu qaadanayo ee Saint Paul.

Haddii aad dhib ku qabtid inaad geshid Seesaw, Schoology ama app kale oo ay degmadu fasaxday adeegsigiisa, fadlan akhri xogta ku qoran halkan: [spps.org/ipadhelp](https://www.spps.org/ipadhelp).

## **Cinwaanka/Lambarka Iskoolku kala Xiriiro Waalidka**

Xiriirrada iyo xogo degdeg loo helo waa arrimo muhiim ah haatan oo la galay waxbarasho khadka internetka ah. Haddii aad qabtid su'aalo, ama aad dooneysid inaad la xiriirtid qof iskoolka jooga, leave a message and your call will be returned as soon as possible.

Principal Rose Santos (English/Spanish) 651-592-8209, [rose.santos@spps.org](mailto:rose.santos@spps.org)

Nurse Imma Anyanwu (English) 651-744-5917, [immaculata.anyanwu@spps.org](mailto:immaculata.anyanwu@spps.org)

Counselor Deborah Malaga (English/Spanish) 651-744-3092, [deborah.malaga@spps.org](mailto:deborah.malaga@spps.org)

Counselor Rosa Miyashiro (English/Spanish) 651-504-4814, [rosa.miyashiro@spps.org](mailto:rosa.miyashiro@spps.org)

Social Worker Traci Rounds (English/Spanish) 612-368-1809, [traci.rounds@spps.org](mailto:traci.rounds@spps.org)

Carol Ontiveros (English) 612-368-1809, [carol.ontiveros@spps.org](mailto:carol.ontiveros@spps.org)

Mao Her (English/Hmong) 612-849-2025, [maovang.her@spps.org](mailto:maovang.her@spps.org)

Northern D'Gayson (English/Karen) 612-434-0839, [northern.dgayson@spps.org](mailto:northern.dgayson@spps.org)

Eh Ku Say (English/Karen) 612-772-5582, [ehku.say@spps.org](mailto:ehku.say@spps.org)

Leh Leh Win (English/Karenni and Burmese) 612-394-1381, [leh.win@spps.org](mailto:leh.win@spps.org)

Dan Clark (English) 612-791-7550, [dan.clark@spps.org](mailto:dan.clark@spps.org)

- Fadlan si joogto uga warqab bogga iskoolkeenna, <https://www.spps.org/leap> wixii xog iyo warar cusub ah.

Degmada SPPS waxay adeegsataa aaladda Blackboard Connect si qoysaska loogu soo sheego wararka muhiimka ah ee iskoolka iyo xogo, munaasabado, saameynta cimilada ee iskoollada, warar degdeg ah, iyo kuwo kaloo badan iyadoo la isticmaalayo email, taleefan, ama farriin. **Cusbooneysii taleefankaaga, email-kaaga, iyo xogaha kale ee meelaha lagaa la soo xiriiri karo oo u sheeg Carol Ontiveros 612-368-1809 ama ku soo qor Campus Portal.**

- Wixii faahfaahin dheeraad ah iyo qaabka loo cusbooneysiyo xogtaada, booqo [spps.org/onestop](https://www.spps.org/onestop).

Waxaad kaloo soo dejisan kartaa app-kan MySPPS app oo laga helo Google Play Store ama Apple App Store. Markaad ku dhufatid "Follow" LEAP High School, durbadiiba waxaad heli kartaa inaad gashid iskoolka wixii cusub iyo wararka soo kordha. Ka raadi "MySPPS" meesha laga helo app-yada. Wax badan ka ogow oo gal: [spps.org/MySPPS](https://www.spps.org/MySPPS).

## **Soo booqashada Iskoolka/Annual Title 1 Meeting**

LEAP High School ayaa ardayda iyo qoysaska u qaban doono booqasho iskool oo khadka internetka ka dhaceyso fiidiyow ahaan si loogu soo dhaweeyo sannad cusub taariikhdan: Thursday, September 3, 2020 at 3:00 p.m. to 6 p.m. You will get a chance to meet your child's teacher and learn about Title 1 services and opportunities.

## **Saacadaha Iskoolka**

Waxaynu raaceynaa saacadihii caadiga ahaa ee uu iskoolku billaabnayay oo dhammaanayay ee 8:30a.m. to 3:00 p.m. , iyadoon loo eegeyn in ardaydu dhigtaan barnaamijka waxbarashada internetka ama midda isku dhafan ama midda iskoolka la imanayo. Waxbaristu waxay dhaceysaa saacadahaan.

## **Cuntada**

Xafiiska nafaqada ee Nutrition Services wuxuu wadi doonaa inuu cunto baakadeysan oo toddobaadle ah geeyo guryaha iyo dhinacyada waddada inta ay socoto waxbarashada durugsan ee SPPS. Dhammaan ardayda u qalanto waxay inay helaan cunto bilaash ah ama mid la qiimo-dhimay waxay heli doonaan cuntada baakadeysan iyadoo lacag la'aan ah.

Qoys walba oo SPPS ah waa inuu buuxiyaa arjiga cuntada ee Education Benefits/Free ama midka Reduced Price Meals – iyadoon la eegeyn dakhliga qoyska soo galo. Keliya tan nagu ma kaalmeynayso inaynu aqoonsanno qoysaska u baahan caawinta ee waxay kale oo ay degmada SPPS u oggolaaneysaa inay barnaamijyada fasallada u hesho lacag Dowladda Federaalka ah ka timid. Arjiga waxaa laga helayaa halkan: [SchoolCafe](#), sidoo kale arji waraaqo ahna waxaa guryaha loo soo diray bishan August.

## **Jadwalka Fasalka**

More information will be shared with you before the start of school.

## **Barnaamijka Distance Learning 2.0**

- Dhammaan ardayda PreK-12 waxaa la siin iPad
- Distance Learning 2.0 waxaa loo kala qeybin qeyb ardaygu xilliguu doono duruusta ka shaqeynayo (asynchronous) iyo qeyb isku wakhti wax la wada baranayo (synchronous)
- Ardaydu waxay macallimiintooda ka helayaan waxbarasho hal-mar dhaceyso (synchronous)
- Waxaa jiri doono isdhex-gal maalin walba u dhaxeeyn doono ardayda
- Ardayda waxay heli doonaan fursad WiFi oo tayadiisa la kordhiyay

Markii la helo faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka Distance Learning 2.0 waxaa lagu soo qori doonaa iyo wixii soo cusboonaada halkan: [spps.org](#). Si aad u aragtid xog dheeraad ah oo quseysa barnaamijka Distance Learning 2.0, booqo [spps.org/distancelearning](#).

Haddii aad qabtid su'aalo aadan jawaabtooda ka helin boggeena, fadlan wac LEAP High School. Waxaad kale oo aad khadka waalidka laga caawiyo ee Parent Help Line ka wici kartaa lambarkan 651-767-8347 ama email ugu qor [family.engagement@spps.org](mailto:family.engagement@spps.org) si lagu caawiyo.

## **Barnaamijka Virtual Learning School**

Barnaamijka SPPS Virtual Learning School waa mid aan qasab ku aheyn ardayda dhigato fasallada PreK-12 ee doonaysa inay sii wataan waxbarashada durugsan 100% sannad-dugsiyeedka 2020-21 oo dhan. **Ardayda isku qorta barnaamijka Virtual Learning School waxay sannad-dugsiyeedka iskoolkooda ka billaabayaan fasalkooda lagu qoray hadda iskoolka LEAP High School.**

## **Jadwalka Iskoolka**

Nuqul ah jadwalka iskoolka ayaa lagu daabacay bogga <https://www.spps.org/leap>. Fadlan ogow in maalmaha jadwalka ku qoran waa la beddeli karaa inta sannadku socdo, wax cusubna waa la soo dhejin karaa mar mar. Jadwalka degmada oo dhan ka akhriso halkan: [spps.org/calendar](https://www.spps.org/calendar).

## **Caafimaadka iyo Fiyoobida**

### **Tallaallada**

Inkastoo ardayda SPPS ay sannadka ku billaabayaan waxbarashada durugsan (distance learning), misana waxaa muhiim ah in aad heysatid xogtii ugu dambeysay ee tallaalka ilmahaaga, iskoolkana aad geysid caddeyn tallaalka. Wax ka ogow taa oo gal halkan: [spps.org/studentwellness](https://www.spps.org/studentwellness).

### **Tilmaamaha COVID-19 ee Ardayda iyo Qoysaska**

Degmada Saint Paul Public Schools waxaa ka go'an inay ardaydeenna, shaqaalaheenna, iyo qoysaskooda helaan bey'ad ammaan ah oo saxo fiican leh. Si loo xaqiijiyo in arrinkan qabsoomo, waxaynu diyaarinay oo aynu naqtiin ku sameyn doonnaa tilmaamayaasha ardayda iyo qoyska ee saf-markan COVID-19 Guidance for Students and Families taas oo jawaab u ah saf-marka COVID-19 ee isbeddelka badan.

### **Macluumaad Quseeyo iska Baarista COVID**

Booqo boga Minnesota Department of Health website si aad u ogaatid goobaha bixinayo isbaaris COVID-19 oo bilaash ah. Xasuusin: Iska hubi in kaarkaaga caafimaadka uu daboolayo kharashka baarista ka hor intaadan ballan qabsan oo aadan iman goobta.

### **Caafimaadka Dhimirka ee Ardayda**

Waynu garowsannahay in iskoollada la xiray, waxbarashada durugsan, iyo COVID-19 ay culeys ku noqdeen qoysaska, ardayda, iyo shaqaalaha. La xiriir la-taliyaha iskoolkeenna counselor Deborah Malaga, Rosa Miyashiro or social worker Traci Rounds ama qofka qaabilsan adeegyada bulshada LEAP High School 612-368-1809 wixii caawimaad ah oo quseeya caafimaadka dhimirka ee ardaygaaga iyo in lagu gu xiro goobo caawinaad dheeri ah leh (community resources) sida ku habboon.

### **Ciyaaraha Isboortiska**

Ardayda dhigato dugsiyada sare waxay u baahan yihiin baaris jir ahaan saddexdii sanaba mar si ay uga qeyb galaan ciyaaraha isboortiska. Kala soo deg nuqul ah arjiga baarista jirka halkan: [spps.org/sports](https://www.spps.org/sports) kana soo buuxi dhakhtarkaaga.

## **Gafuur-xirka Degmada SPPS**

Barasaabka Minnesota Tim Walz wuxuu amar ku bixiyay in gafuur-xir wejiga lagu xirto dhammaan meelaha dadweynuhu isugu imanayaan ee gudaha dhismayaasha Minnesota ah sida iskoollada. Amarkan barasaabka ka soo baxay waxaa lagu dabiqi dhammaan martida iskoolka, shaqaalaha, iyo ardayda (wixii ka billowda Kindergarten iyo ka weyn). Shaqaalaha SPPS iyo martida iskoolkaba waxaa weligood laga filayay inay xirtaan gafuur-xir tan iyo bishii April. Ardayda dhigato Pre-K laguma amrin inay xirtaan gafuur-xir.

- Wax badan ka akhri arrinta gafuur-xirka oo gal: [spps.org](http://spps.org).

Waxaan sugi la'ahay inaan idinku soo dhaweeyo adiga iyo ilmahaaga sannad-dugsiyeedka cusub **Talaadada, September 8, fasallada 9-12**. Waxaan aad ugu faraxsanahay inaan ka mid noqdo bulshada wanaagsan ee iskoolkan.

Qaddarin badan,

Rose Santos, Maamule  
LEAP High School